# Maxaa La Sameeyaa Nidaamkaaga Faaruqa inta lagu jiro Daadadka

Warqaddan xaqiiqada ah waxaa loogu talagalay mulkiilayaasha hantiyeed ee adeegsanaya Nidaamyada Daawaynta Biyaha wasakhda ee Dhulka Hoostiisa (SSTS ama nidaamyada faaruqa) oo ku saabsan waxa la sameeyo kahor, inta lagu jiro, iyo kadib daadadka.

## Ka Hortagid

### Maxaan sameeyaa haddii aan ku noolahay aag ay ku badan yihiin daadadku si aad uga hortagto kahor intaan daadka dhicin?

- U yeelo farsamayaqaan shati leh inuu ku rakibo qalabka ka hortagga dib-u-soo-noqoshada qashinka ee tuubada qashinka gurigaaga si qashinku uusan dib ugu soo noqon gurigaaga inta lagu jiro daadad. Waxaa lagula talinayaa in la isticmaalo qalab ka hortag ah oo lagu kalsoonaan karo, maxaa yeelay waxaa jira cabsi ah in valve-yada caadiga ahi aanay si sax ah u xirmin oo qashinku dib ugu soo noqon karo guriga.
- Hubi in dhammaan daboolada baaritaanka ay ku jiraan meeshii loge talagalay. Daboolada la duubo waxaa lagu rakibi karaa, tuubooyinka ayaa lagu gooyaa heerka dhulka.

## Isla Kahor Inta Aan Daadka Dhicin

### Maxaan sameeyaa isla kahor inta aan daadka dhicin?

- Haddii nidaamka qashinka guriga uu leeyahay qalab ka hortag ah, wax kale looma baahna in la sameeyo.
- Haddii qalabka ka hortagga uu yahay valve gacanta, hubi in la xiro.
- Haddii haanta aanay lahayn qalab ka hortagga dib-u-noqoshada qashinka, waxaa laga yaabaa in la rabo in haanta la shubo si qashinka looga saaro, laakiin haanta waa in si fiican loo xareeyo. Shubidda isla kahor daadadka lama huraan ma aha. Haddii la shubo, qashinka adag qaar ayaa ku haraya haanta waxaana laga yaabaa inay ku darsamaan biyaha daadadka ee gala haanta. Waxaa laga yaabaa inay faa'iido leedahay in la xiro biyo mareenada hoose ee dhismaha si looga hortago dib-u-soo-noqoshada.

## Inta Lagu Jiro Daadka

### Maxaan sameeyaa haddii nidaamka faaruqa uu biyo daboolaan?

- Ha isticmaalin nidaamka. Demi mashiinnada biyaha jilcinta si aysan u bilaabin nadiifinta. Demi dhammaan qalabka korontada ee nidaamka (bamka, alaarmiyada, iwm.)
- Haddii aad isticmaaleyso biyo ka yimaada ceel daadadku daboolay, waxaa laga yaabaa in biyahaasi ay wasakheysan yihiin. La xiriir xirfadle ceelal ama xafiiska gobolkaaga si aad ugu sameyso baaritaan

# Kadib

## Marka biyaha daadadku ay hoos u dhacaan, goorma ayaan mar kale isticmaali karaa nidaamkayga?

Ha isticmaalin nidaamka ilaa:

- Ciida si fiican u engegto si ay u awooddo in ay nuugto qashinka iyada oo aan dib-u-soo-noqosho dhacayn. Tani waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad. Waa inaad isku daydaa inaad biyo yareyso ilaa nidaamka uu si buuxda u qalalo.
- Dhammaan haamaha waa in la hubiyaa si loo arko haddii ay jiraan biyaha daadadka. Haddii ay jiraan, haamaha waa in la shubaa si looga hortago in dhoobada ay gasho nidaamka ciidda. Haddii haamaha aan la xareyn, ha shubin ilaa heerka biyaha ee ciidda uu ka hooseeyo haanta.
- Shaashadaha biyaha (haddii ay jiraan) waa in la nadiifiyaa.
- Nidaamka korontada (haddii uu jiro) waa in la baaro. Tani waxaa ka mid ah isku xirnaanshaha korontada, bamka, alaarmiyada, iwm. Haddii nidaamkaaga uu leeyahay qalab horumarsan oo daawaynta ah, waa inaad la xiriirtaa bixiyaha adeegga shatiga leh ka hor intaadan hawlgalin.
- Furayaasha furitaanka haamaha waa in si degdeg ah loo sugo, loo hagaajiyo, ama loo beddelaa haddii daboolku uu ku dhaqaaqay, u guuray, ama lumay daadadka.
- Wixii dhaawac cad ah waa in la hagaajiyaa.

## Sidee baan ku ogaan karaa haddii nidaamkaygu dhaawacmay?

Calaamadaha dhaawaca waxaa ka mid ah:

- Dhinaca ciidda ee ku ag yaal haanta ama nidaamka ciidda oo hoos u dhacay.
- Nidaamka oo aan aqbalin biyaha wasakhda ah, taas oo lagu ogaado qashinka soo noqday ama ku soo baxay dhulka. Haddii aad aragto mid ka mid ah calaamadaha kor ku xusan kadib markii biyaha daadadku hoos u dhacaan, la xiriir xirfadle SSTS. Waxaad ka heli kartaa xirfadlayaasha: https://webapp.pca.state.mn.us/ssts/business-search.

## Maxay yihiin walwalada la xiriira hawlaha nadiifinta iyo nidaamka faaruqa?

- Nadiifinta guriga waxay u badan tahay inay soo saarto qadar badan oo jeermis dilayaal iyo nadiifiyayaal ah oo la galiyo haanta faaruqa. Waxaa fiican in haamaha la shubo (marka labaad haddii biyaha daadadka la shubay) si looga hortago in kiimikooyinkan loo soo saaro nidaamka ciidda.
- Ha ku shubin biyaha daadadka ee guriga galay meel tuubo la socda nidaamka SSTS.
- Ha dulmarin gaadiid iyo qalab nidaamka inta lagu jiro hawlaha nadiifinta ama soo celinta. Ha saarin qashin qubayaal ama agab dhismeed nidaamka. Xero nidaamka si aad u ilaaliso.



Washed away SSTS in eroded stream bank

## Maxaan sameeyaa nidaamka faaruqaada kadib daadadka?

- Hubi dhirta ka koraysa haanta faaruqaada/gobolka nuugista ciidda.
- Hagaaji waxyeelada duufaanta oo dhir gooy ama wax beer sida loo baahdo si loo siiyo dabool sax ah.

## Maxaan sameyn karaa shaqo la xiriirta nidaamka faaruqa aniga oo keliya?

- Sababo khataro badan la xiriira shaqada nidaamyada faaruqa (gudbinta cudurrada, gaasaska sunta ah, iyo shoog koronto) waxaa si xoog leh lagula talinayaa in dhammaan shaqada nidaamka faaruqa ay fuliyaan ganacsiyo shatiga leh oo SSTS ama farsamayaqaan shati leh ee korontada.
- Haddii xirfadlayaashan ay go'aamiyaan in nidaamkaaga aan la waxyeelleyn, mulkiilaha guri waa uu dhir beeri karaa ama dhir goyn karaa meel dhaawac gaadhay.

## Xagee ka heli karaa macluumaad ku saabsan ilaalinta nidaamka faaruqaada?

- La xiriir adeegga deegaanka ee gobolkaaga ama waaxda qorsheynta iyo degaanka si aad u hesho talo dheeraad ah iyo caawimaad. Hagaha mulkiilaha nidaamka faaruqa waxaa laga heli karaa Jaamacadda Minnesota: https://bookstores.umn.edu/product/book/septic-system-owners-guide oo leh macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daadadka: https://septic.umn.edu/septic-system-owners/maintenance/septic-flood.
- Waxaad sidoo kale wici kartaa MPCA 800-657-3864 wixii su'aalo ah ee la xiriira daadadka SSTS.